


# BARNAAMIJKA FURSADA DIB-UDAJINTA QAXOOTIGA

Malaayiin qaxooti ah oo adduunka dacaladiisa ku nool ayaa raadiya xal magan galyo, laakiin awooda dib-u-dejintu waa naadir. Shantii sano ee lasoo dhaafay in ka yar 4% ayaa nasiib u helay am ka faa'iideystay barnaamijka dib udajinta qaxootiga. Kanada waxay sumcad ku heshay sida ay uga go'an tahay dib u dejinta qaxootiga. Marka ay imaado dib u dejinta qaxootiga Dowladda Kanada waxay ku tiirsan tahay mujtamaca Kanadiyaanka qaybahooda kala duwan; sida hay'adaha gaarka loo leeyahay iyo kuwa aan faa'iido doonkaaa ahayn. Dhab ahaantii, laga soo bilaabo 2013, qaxooti badan ayaa Kanada ku yimid kafaalo-qaadka gaar ah in ka badan kuwa ay taageeradooda bixiso dawladda. Barnaamijka Kafaala-qaadida Gaarka ah ee Qaxootiga (PSR) waa mid ka mid ah saddexda barnaamij ee ay kooxaha iyo ururada Kanadiyaanka ah ay ku kafaala-qaadaan did udajinta qaxootiga caalamka.

Iyada oo laga jawaabayo baahida sii kordheysa ee dib-u-dejinta wax tarka leh qaxootiga, Ururka Kanadiyaanka ee soo-galootiga iyo qaxootiga ee marka la soo gaabiyo loo yaqaano (CAIR) ayaa soo bandhigay nidaamka fursada dib-udajinta qaxootiga oo ku baxaya hanaanka elektarooniga ah. Hanaankani wuxuu awood u siinayaa qaxootiga iyo magangalyo-doonka adduunka oo dhan inay soo gudbiyaan codsiyada dib-udejintooda Kanada, iyadoon loo eegin meesha ay joogaan.

CAIR waxay isticmaashaa nidaamka fursada dib-udajinta si ay u siiso dhammaan qaxootiga iyo magangalyo-doonka fursad siman oo ay ku soo gudbiyaan codsiga ay ku muujinayaan rabitaanka ka qayb galkooda iyadoo xulashada ay ku xirnaan doonto nasiibka codsadaha. Tani waxay kor u qaadaysaa caddaaladda iyo hufnaanta kuwaas oo lagama-maarmaan u ah hubinta in qaxootiga iyo magangelyo-doonka ugu mudan ay helaan taageerada iyo caawinta ay u baahan yihiin.

Mid ka mid ah qaybaha ugu muhiimsan ee nidaamka fursada dib-udajinta qaxootiga waa awooda dhaqaale ee hayadeena. CAIR waxay sanadkiiba furtaa hal fursad dib-udajin iyadoo tirada ku guulaystana ay tahay tiro xadidan. Tani waxay ka dhigan tahay in barnaamijka fursada dib-udajinta uu dooranayo tiro xaddidan oo guuleestayaal ah. Waxaa iyadana muhiim ah in ka qayb galayaashu ogaadaan in soo gudbinta codsiga rabitaanka fursada dib-udajinta kaliya aysan dammaanad qaadin dib u dejintaada kanada. Kaliya kuwa ku guulaysta fursada dib-udajinta ayaa heli doona martiqaad ama (invitation) inay soo gudbiyaan codsiga kafaala-qaadka qaxootiga.




Habka codsashada barnaamijka fursada dib-udajinta qaxootiga ee CAIR wuxuu caadi ahaan salka ku hayaa dhowrkan tillaabo ee soo socda;

## CODSIGA RABITAANKA KA QAYB GALKA

Sida ay u noqdaan kuwa ku guulayto fursada dib-udajinta qaxootiga Kanada, ka qayb galayaashu waa inay buuxiyaan foom online ah si ay umuujiyaan rabitaanka ka qayb-galkooda. Habkan codsiga elektarooniga ah waxa uu furnaanayaa muddo lix toddobaad ama 42 maalmood. Muddadaan kooban waxay u oggolaanaysaa shakhsiyaadka ka qayb galaya inay ku soo gudbiyaan xogtooda ama macluumaadkooda. Iyadoo lamarayo habkan kor ku xusan, ka qay galayaashu waxay codsan karaan xiisaha ay u qabaan inay u guuraan Kanada iyagoo maraya habka dib-udajinta qaxootiga.

## HUBINTA SHURUUDAHA

Si aad u kordhiso fursada ku guuleysashada fursada dib-udajinta waxaa muhiim in aad buuxin kartid shuruudaha soo socdo sida in aad tahay;

- Qof heesta aqoonsi qaxoonti ama magangalyo doon. Haddii aadan haysan aqoonsi qaxooti, qeex oo sharax sababta aadan u haysan.
- Qof ku nool meel ka baxsan waddankii uu udhashay (ama waddanka uu degganaan jiray).
- Qof saameen adag ku yeeshay dagaal sokeeye ama iska horimaad hubaysan.
- Qof si joogta ah loogu diiday xuquuqaha aasaasiga ah ee aadanaha.
- Qof cabsi darteed aan ku laaban karin wadankiisa iyadoo lagu bartilmaamaydsanayo isirkiisa, diintiisa, ra'yigiisa siyaasadeed, dhalashadiisa, ama xubin ka ahaanshaha koox bulsho oo gaar ah.

## SOO GUDBI FOOMKA CODSIGA KA QAYB GALKA

- Xogtaada shaqsiyadeed: Magaca, taariikhda dhalashada, goobta dhalashada, luqadaha aad ku hadashid, xaaladda guurka.
- Macluumaadka lagaala soo Xiriiro: ciwaanka iimaylka iyo lambarka taleefanka.
- Xaaladdaada dal kujoog: Jinsiyadda, wadanka aad dagan tahay iyo sharciga dal ku joog ee aad ku joogtid dalka aad dagan tahay.
- Soo dir sawir cusub oo ka yar 6 bilood ama iska qaad sawir teesaro ah
- Bixi lacagta ka qaybgalka oo dhan $45
- Hubi foomka oo soo gudbi ama soo dir.




## HABKA XULASHADA GUULEYSTAYAASHA FURSADA DIB-UDAJINTA

Ka dib marka la xiro xilliga codsiga bakhtinasiibka waxaa bilaabanaya habka xulashada guulaystayaasha. Xulashadu waxay ku salaysan tahay oo keliya nasiibka ka qayb-galaha. Qori tuurka waxaa lagu maamulayaa hab elektaroonig ah (macnaha kombutarka ayaa dooranaya) iyada oo loo isticmaalayo koodka lagu diiwaan galiyay codsi kasta. Nidaamka kombuyuutarku wuxuu markaa isticmaalayaa habka xulashada aan kala sooca laheen si uu uga soo dhex doorto guuleystayaasha dadkii soo codsaday fursada dib-udajinta.

Haddii aad soo buuxin kartid dhammaan ama qaar ka mid ah shuruudaha kor ku xusan, soo gudbi codsiga loo yaqaan “Muujinta-Rabitaanka ka qayb galka” ee fursada dib-udajinta qaxootiga ka hor inta aanan laguu soo dirin casumaad inaad soo gudbiso codsiga kafaala-qaadka qaxootiga ee loo yaqaan (isbonsarka qaxootiga).

## MAXAA XIGA MARKAAD MARKA AAD KA QAYB-GASHID FURSADA DIB-UDAJINTA

Marka aad soo gudbisid codsiga “Muujinta-Rabitaanka ka qayb galka” ee loo yaqaan (EOI), waxaa fomkaaga lagu dari doonaa dhammaan fomamka musharixiinta soo buuxiyay shuruudaha ka qayb-galka fursada dib-udajinta qaxootiga. Haddii aad ka mid noqoto guulaystayaasha;

- CAIR Waxay kuu soo diraysaa casumaad inaad soo gudbiso codsiga ama foomka damaanad-qaadka qaxootiga (foomka isbonsarka qaxootiga).
- CAIR waxay kaa caawin doontaa dhamaystirka codsiga/foomka isbonsarka.
- CAIR iyada oo wakiil kaa ah waxay foomka damaanad-qaadka qaxootiga udiri doontaa hay’ada socdaalka, qaxootiga iyo dhalashada Kanada ee loo yaqaan (IRCC).
- CAIR kama qaadato wax lacag ah qaxootiga ay kafaalo-qaadato mana waydiin doonto qaxootiga ay damaanad-qaadato inay dib u bixiyaan wax qarash ah marka ay Kanada yimaadaan. Sidaa darteed, qaxootigu waa in aysan u gacan galin ama dhibane u noqon burcadda isxambaarka.
- CAIR waxay qaxootiga siin doontaa caawimo dib-udajin oo leh taageero garab-istaag iyo mid dhaqaaleed inta lagu jiro mudada kafaala-qaadka oo caadi ahaan gaaraysa ilaa hal sano laga bilaabo imaatinkooda Kanada.
- CAIR kaliya waxay aqbashaa deeqaha shaqsiyaadka iyo ururada waxayna uga mahadcelinaysaa dhammaan shaqsiyaadka iyo ururada nagu caawiyay deeqahooda deeqsinimada leh.




## JAANTUSKA MARXALADAHA BARNAAMIJKA FURSADA DIB-UDAJINTA




## KA QAYBGAL FURSADA DIB-UDAJINTA QAXOOTIGA MARKA UU FURMO

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah ama aad su'aal qabto, waxaad nagala soo xiriiri kartaa emailkeena resettlement@thecair.com